Ogeysiiska Ka-saaridda ama u Waareejinta Xarunta Lagu Xannaaneeyo Waayeelka

Nursing Home Transfer or Discharge Notice

Ogeysiiska qoraalka ah ee ka wareejinta ama ka-saaridda, iyo sababaha keena ka guuridda, waa in qofka deggan iyo wakiilka(lada) qofka deggan lagu siiyaa, luuqad iyo hab ay fahmayaan, ugu yaraan 30 maalmood ka hor kala-guurka ama ka-saaridda, ama sida ugu dhaqsiyaha badan ee suuragalka ah marka mid ka mid ah waxyaabaha ka-reebban ee ku xusan 42 CFR 483.15(c)(4)(ii) ama (8) la adeegsan karo. Shuruudaha nidaaminta ayaa waxaa laga helaa 42 CFR 483.15(c), RCW 74.42.450, WAC 388-97-0120, iyo WAC 388-97-0140. **Sida ku cad 42 CFR.**

☐ **Ka-wareejin** ☐ **Ka-saarid**

Macluumaadka Qofka Deganaha ah	
MAGACA QOFKA DEGANAHA AH	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEGAANKA)
CINWAANKA	
Macluumaadka Wakiilka Qofka Deganaha ah	
MAGACA WAKIILKA QOFKA DEGANAHA AH	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEGAANKA)
CINWAANKA	XIRIIRKA UU LA LEEYAHAY QOFKA DEGANAHA AH
Macluumaadka Xarunta Lagu Xannaaneeyo Waayeelka	
MAGACA XARUNTA LAGU XANNAANEEYO WAAYEELKA	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEGAANKA)
CINWAANKA	
MAGACA QOFKA XIRIIRKA	LAMBARKA TELEEFOONKA XIRIIRKA (KU DAR FURAHA DEGAANKA)

Taariikhda Ogeysiiska La bixiyay / Taariikhda Dhaqan-galka

Ogow: Taariikhda dhaqan-galka waa in ay noqotaa ugu yaraan 30 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska la bixiyay haddii mid ka mid ah waxyaabaha ka reebban ee 42 CFR 483.15(c)(4)(ii) ama (8) ku dabaqmo mooyaane. Degganaha wuxuu dooran karaa in uu guuro ka hor taariikhda dhaqan-galka la filayo.

TAARIIKHDA OGEYSIISKA LA BIXIYAY	TAARIIKHDA DHAQAN-GALKA (TAARIIKHDA KA-SAARIDA)

Goobta uu Degganaha u Wareegayo ama Laga Saarayo (loo baahan yahay)	
MAGACA	LAMBARKA TELEEFOONKA (KU DAR FURAHA DEGAANKA)
CINWAANKA	

SABABTA KEENTAY WAREEJINTA AMA KA SAARIDA

Ogow: Xarunta waa in ay deggane kasta u oggolaataa in uu xarunta ku sii jiro, iyo in aanu wareejin ama ka-saarin degganaha, haddii mid ka mid ah kuwan soo socda uu run yahay mooyaane.

- ☐ Wareejinta ama ka-saaridda waxaa loogu baahan yahay daryeelka degganaha, baahiyaha degganaha ee xaruntanna lagama soo bixi karo.
- ☐ Wareejinta ama ka-saaridda waa mid habboon sababta oo ah caafimaadka degganaha si dad ku filan ayuu u hagaagey sidaa daraadeed degganaha uma baahna adeegyada ay xarunta bixisay.
- ☐ Bedqabla shakhsiyaadka kale ee xaruntan ayaa halis ku jira iyadoo ay sabab u tahay xaaladda caafimaadka ama hab-dhaqanka ee degganaha.
- ☐ Caafimaadka dadka kale ee ku sugan xarunta ayaa haddii kale halis geli lahaa.
- ☐ Degganaha wuu ku guuldareystay, kadib ogeysiis macquul ah oo habboon, in uu bixiyo kharashka (ama in ay ka bixiyaan Medicare ama Medicaid) muddada uu ku sugnaanayo xaruntan.
- ☐ Xarunta waa la xirayaa.

Fadlan bixi sharaxaad kooban si aad ugu taageerto tallaabadan. Ku soo lifaaq dokumenti dheeraad ah haddii uu yahay mid lagama maarmaan ah.

Codsanaya caawimaad: Haddii la codsado, xarunta waa in ay bixiso kaalmada lagama maarmaan ah si loola xiriiro hay'adaha ku xusan bogga ku xiga boggan iyo/ama in la codsado rafcaanka go'aankan haddii aad ka soo horjeedo wareejinta ama ka-saaridda. Fadlan eeg magaca iyo lambarka telefoonka xiriirka xarunta lagu xannaaneeyo waayeelka ee kor ku xusan.

Xuquuqaha Rafcaanka:

- Waxaad xaq u leedahay in aad rafcaan ka qaadatid wareejintan ama ka-saariddan adiga oo codsi dhageysi u gudbinaya Xafiiska Dhageysiyada Maamulka La Xiriira ee Gobolka Washington. Codsigaaga loogu talogalay dhageysiga waxaa la soo gudbin karaa waqti kasta ilaa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda aad ogeysiiskan hesho.
- Haddii aad go'aansatid rafcaan, waxaad dhageysiga u codsan kartaa shakhsi ahaan, qaab teleefoon / boostada ama qoraal. Waxaad adeegsan kartaa foomka halkan ku lifaaqan (DSHS 10-238, Codsiga Dhageysiga Maamulka La Xiriira) si aad u codsato racfaan laakiin lagaa ma doonayo.
- **Waxaad xaq u leedahay in aad sii joogtid xarunta ilaa rafcaanka laga go'aansado, haddii codsiga dhageysiga la helo marka ay tahay ama kahor taariikhda la filanayo wareejinta / ka-saarida, ama maalinta adiga sida dhabta ah laguu wareejiyo / laguu saaro**. Marka laga reebo haddii in aan lagaa saarin ama lagaa wareejinin xarunta ay halis gelinayso caafimaadkaaga ama bedqabkaaga, ama caafimaadka ama bedqabka shakhsiyaadka kale ee xarunta, waa lagaa saari karaa ama lagaa wareejin karaa. Taariikhda ka-saaridda / ka wareejinta ee la soo jeediyay waxaa ay ku taallaa bogga hore ee ogeysiiskan.
- Haddii aadan rafcaan ka qaadanin, xarunta lagu xannaaneeyo waayeellada waxaa ay sii wadi kartaa wareejintaada ama ka-saaridaada.
- Haddii go'aanka dhageysiga uu taageerayo go'aanka xarunta lagu xannaaneeyo waayeelka (aad ku guuldareysato rafcaanka), xarunta lagu xannaaneeyo waayeelka waxay sii wadi kartaa wareejintaada ama ka-saaridaada 30 maamood kadib marka la soosaaro amarka u dambeeya ee taageeraya go'aanka.
- Haddii ka-saaridda / wareejinta aanan la taageerin (aad ku guulaysato rafcaanka), oo aadana ku jirin xarunta, waxaad xaq u leedahay in aad si degdeg ah dib ugu noqoto xarunta marka la helo sariir bannaan oo taalla qol la wadaago, haddii aad u baahan tahay oo aadna xaq u leedahay adeegyada ay xarunti bixiso.

Diridda codsiyada dhageysiga ee: OFFICE OF ADMINISTRATIVE HEARINGS
PO BOX 42489
OLYMPIA WA 98504-2489
Lambarka telefoonka: 1-800-583-8271 FAKISKA: (360) 586-6563

Shaqaalaha Baara Cabashooyinka ee Gobolka Washington:

Barnaamijka Shaqaalaha Baara Cabashooyinka Daryeelka Muddada-Dheer ee Gobolka Washington ayaa loo heli karaa in uu kaaga jawaabo su'aalahaaga iyo in uu ku siiyo kaalmo ku saabsan ogeysiiskan iyo arrimo kale. Iyadoo loo marayo shaqada shakhsi "Shaqaalaha Baara Cabashooyinka / LTC Ombuds," Barnaamijka Shaqaalaha Baara Cabashooyinka ayaa ilaaliya oo kor-u-qaada xuquuqaha sharci ee degganaha ku nool xarumaha LTC. Barnaamijka Shaqaalaha Baara Cabashooyinka qayb kama ahan dowladda ama maamulka gobolka lalamana xiriiriyo wax xarumo daryeelka muddada-dheer ah. Haddii aad dooneyso in aad caawimo ka codsato Shaqaalaha Baara Cabashooyinka ee LTC, wac telefoonkan bilaashka ah 1-800-562-6028. Waxaad sidoo kale codsigaaga oo qoraal ah ku soo gudbin kartaa fakiskan (253) 815-8173, email-kan ltcop@mschelps.org ama boostadan 1200 S. 336th St., Federal Way, WA. 98003.

Xuquuqaha Naafonimada Washington:

Haddii lagaa helay xanuun dhimirka ah ama Naafonimo caqliga ah, waxaad la xiriiri kartaa kooxda Xuquuqaha Naafonimada Washington si lagaaga caawiyo rafcaanka aad go'aankan ka qaadaneyso, adiga oo kala xiriiraya lambarkan bilaashka ah 1-800-562-2702, ama (206) 324-1521. Waxaad sidoo kale codsigaaga oo qoraal ah ku soo gudbin kartaa fakiskan (206) 957-0729, email-kan info@dr-wa.org ama boostadan Disability Rights Washington, 315 5th Avenue S, Suite 850, Seattle, WA, 98104.

Wakiilka / Maamulaha Xarunta

Fadlan calaamadee dhammaan kuwa ku habboon:

☐ Ka hor inta degganaha aan isbitaalka loo wareejin, ogeysiiska qoraalka ah ee siyaasadda sariirta xarunta ayaa la siiyaa degganaha iyo wakiilka(wakiillada) degganaha iyadoo la raacayo shuruudaha ku xusan 42 CFR 483.15(d) iyo WAC 388-97-0120(4).

☐ Markay tahay _____, iyadoo la raacayo xeerka federaalka iyo gobolka, nuqullada dokumentigan, lifaaqa khasabka ah DSHS 10-238, iyo dhammaan lifaaqyada ikhtiyaariga ah ayaa la siiyay deggahana, wakiilka(wakiillada) degganaha, Xafiiska Gobolka ee Shaqaalaha Baara Cabashooyinka LTC, iyo DSHS.

Ogeysiiska waxaa bixiyay:	
SAXIIXA WAKIILKA / MAAMULAHA XARUNTA LAGU XANNAANEEYO XARUNTA TAARIIKHDA	MAGACA QORAN

Ogeysiiska waxaa la siiyay:	
MAGACA QORAN EE QOFKA DEGANAHA AH TAARIIKHDA	MAGACA QORAN EE WAKIILKA QOFKA DEGANAHA AH TAARIIKHDA